



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Barlamaanka Federaalka Soomaaliya**

**Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalkakalfadhiga 6-aad**

**Documentiga kalfadhiga 6-aad kulankiisa:2-aad**

**Tr:09.05.2015**

---

**Kalfadhiga 5-aad**

**Kulankiisa:2-aad, sacada furitanka.12:05 gh, sacada xiritanka.12:38 gd.**

**Guntinta: 150 xildhibaan.**

**Ajendaha:**

- 1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
- 2.Ansixinta Ajendaha**
- 3.Soo Bandhigida Rai'sal Wasaaraha ee Barnaamijka Xukuumadda oo faah-faahsan.**

**Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

**Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.**

**1.Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.**

**2.Guddoomiyaha wuxuu ka codsaday xildhibaanada Barlamaanka in ay ansixiya An ajendaha xildhibaanadana wey ansixiyeen.**

**Guddoomiyaha wuxuu sheegay in dalka Norway ay I noo kentay (Hadiyad).**

Intaa ka dib Guddoonka wuxuu soo jeediyay, xildhibaanada waxaan codsanay in nalo

Keeno Barnamijka Xukuumada, waana loo keenay waxaa inoo akhrinaya

Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cabdala Cawad.

**Guddoomiye Mahad Cabdalla Cawad**,wuxuu soo jeediyay,Golaha Shacab waxaa waa jib ku ah in uu ka soo baxo wada shaqeynta xukuumada oo uu no soo bandhigi doono Rai'sal wasaaraha Barnamijkiisa oo faah-faahsan,waxaa kale oo jiri doono qorshe lagu wada shaqeyn dono xildhibaanada iyo wasaaradda Ajendaha waa in uu guddi kasto la socdaa wasaaradda ay qusayso si ay u wada shaqeyan, 15guddi waa in uu mid -mid ula shiro Rai'sal wasaaraha, 11-12 waxaa iska leh guddiyada Howlaha waxa kalo ka mid ah in Dib U ee gista lagu sameyn doono Dastuurka.

**Guddoomiyaha Golaha**,wuxuu soo jeediyay, Rai'sal Wasaaraha wuxuu soo jeedinayaa Barnamijka Xukuumada oo faah-faahsan, maalinta Axada,Isniinta,Talaadada waxaa iska leh guddiyada sida ay u wada shaqeyn donan guddiga iyo wasaaradda ay qusayso, maalinta Arbacada waxaa inoo furmaya Golaha.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha wuxuu ku soo dhaweyay Rai'sal wasaaraha.

**Rai'sal Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.**

**3. Mudane:Cumar Cabdirashiid Cali Sharma arke:**wuxuu soo jeediyay,oo uu Golaha ka hor akhriyay Barnamijka xukuumada oo faah-faahsan,waxaa sharaf inoo ah inaan idinla wadaagno qorsho howleedka xildhibaanada iyo wasiiradda.

Golaha wasiiradda waxay ansixiyeen 7dii may Dib u eegista Dastuurka,waxaan ka xumahay in ay is casishay Guddoomiyaha guddiga madaxa banan ee Dastuurka Marwo:Caasho Geele Diiriye, waxaa kaloo la ansixiyay 7dii may,Amniga 3da bil ee la soo dhaafay, Al-shabaab waxay sameyan argagaxisanimu siyaasaded,waxa

An kaloo Hotelada ku boorinaya in ay shaqaalahoda la wa daagan Amniga waxan kale oo aan sameynay wasaaradda gaashandhiga ay qayb ka tahay guddi amni cadaalad, garsoor,waxaan meel marinay guddiga adeega garsoorka, tan kale oo an rabno in aan kor u qaadno waa kobcinta dhaqaalaha oo ah matoorka ay ku

socoto dowlada,kordhinta daqliga waxa la meel mariyay canshuuraha sida,xaw-aaladaha,hantida maguurtada, waxaan sameynay 3 guddi oo kala ah.

a)Wasaaradda maaliyadda

b)Wasaaradda Qorshaynta iyo iskaashiga Caalamiga

c)Bankiga Dhexe

Waxaa kale oo noo qorshaysan in nalaga cafiyo malaayiintii lacageed ee nalagu lahaa ,waxaa kale oo qorshaha noogu jiro in la abuurto kumanaan shaqo oo loo abuurayo dhalinyarada si ay u helaan fursad laguna kal sonado, waa in aan helnaa Dowlad wanaag si aan u helno cadaalad,waa in miisaaniyad cusub loo samayaa waxaana ka shaqeynaya Guddiga maaliyadda iyo wasaaradda maaliyadda,

Wasaaradda waxbarashada oo sanadkan la wareegtay imtixaanadka dugsiyada sare si tayo loogu helo waxbarashada, teeda kale muwaadinka shaqaalaha ah waa in uu helaa xuquuqdisa, waa in xuquuqul aadanaha lagu xadgudbin si muwaadinka loogu sameyn gabood fal.

Inta ka dib Rai'sal wasaaraha wuxuu u mahad celiyay Guddoonka iyo xildhibanad.

**Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegay, xildhibaanada waxaan kulmeyna 14.5.2015**

Ka dibna 16.5.2015 ayaan isugu imaan doona.

**Kalfadhiga 6-aad kulankiisa:2-aad uu shir-guddoominayay Guddoomiyaha**

**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed Mudane:Muxamed sheikh Cusmaan jawaari wuxuu sheegay in uu shirka xiran yahay sacad markay ahayd 12:38gd.**